

# BALLANQAADKAYAGA ADIGA KUGU SAABSAN

Seattle City Light iyo Adeegyada Dadweynaha Seattle, hadafkayaga ugu wayn waa inaan ilaalino macmiilkayaga qiimaha leh, oo aan qancino. Adeeg dadweyne ahaan, waxaanu ballan qaadaynaa inaanu ku siino adeega ugu fiican ee suurtogalka ah. Waa kan sida:

### Waxaa naga go'an inaan ku so dirno kharashka biilka oo sax ah oo waqtigeeda ku habboon, kuna siino adeegyo, iyo taageero.

Waxaan ballan qaadeynaa inaan ku soo dirno biilasha saxda ah, ikhtiyaarka lacag bixinta, iyo caawimo markaad u baahato. Waxaan bixinaa taageero maaliyadeed oo loo siman yahay iyo adeegyada soo socda:

- Waxaan haynaa qorshooyin aad ku bixinayso biilka si tartiib tartiib ah si aan u daboolno baahiyahaaga.
- Waxaan siinaa macaamiisha City Light ee degan Seattle ikhtiyaarka biilka miisaaniyada. Waxaad bixin kartaa lacag isku mid ah bil kasta si aad si fiican ugu maamusho kharashaadkaaga.
- Waxa aanu kuu haynaa hab aad kaga doodi karto biilkaaga Adeegyada Dadweynaha Seattle ama biilka Seattle City Light.

### Waxaa naga go'an inaan kaa caawino sidii aad u maareyn lahayd oo aad u dhimi lahayd kharashaadkaaga tamarta.

Waxaan halkaan u joognaa inaan kaa caawino inaad dhinto biilashaada ado ka qayb qaadanaya ilaalinta deegaanka. Waxaan bixinaa adeegyadan si aan kuu taageerno:

- Waxaan siina qiimo dhimis xaga tamarta ah macaamiisha deegaanka ee dakhliga-qalma. Waxaad heli kartaa qiimo dhimis biilashaada mustaqbalka.
- Waxaan siinaa barnaamijyada gargaarka degdegga ah macaamiisha deegaanka ee dakhligoodu hooseeyo. Waxaad heli kartaa gargaar degdeg ah si aad u yarayso Kharashkii hore ee lagugu laha.
- Waxaan bixinaa xalalka yarayntaka tamarta iyo siyaabaha loo yareeyo isticmaalka biyaha. Waxaad gacan ka geysan kartaa ilaalinta deegaanka iyo hoos u dhigidda kharashaadka tamarta.

### Waxaan ballan qaadaynaa inaan ku siin doono adeeg macmiil oo degdeg ah oo la isku halayn karo.

Waxaan rabnaa inaan kuu fududeyno inaad hesho jawaabaha ku saabsan adeegyadaada Tamarta - on-layn, qof ahaan, taleefoonka, ama qoraal ahaan. Wakiiladayadu waa kuwo aqoon iyo ixtiraam leh. Waxaad ka filan kartaa inay kaa caawiyaan adeegyada soo socda:

- Waxaan ku siinaynaa Mareegta Adeegyada tamarta si aad u maamusho macluumaadka akoonkaaga. Waxaad bixin kartaa biilasha, bilaabi kartaa ama joojin kartaa adeegga, oo waxaad ka heli kartaa macluumaad waxtar leh.

- Waxaan haynaa wakiilo adeega macaamiisha ah oo laga heli karo (206) 684-3000 maalmaha shaqada laga bilaabo 7:30 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo Waxaadna weydiin kartaa su'aalo, lacag bixin, oo waxaad nagala hadli kartaa fursadaha lacag bixinta.
- Magaalada oo dhan waxaan ku leenahay Xarumo Adeeg Macmiil si aad shakhsi ahaan ugu bixiso biilkaaga.
- Waxaan haysanaa xisaabiyeyaasha adeega macaamiisha oo aad booqan karto. Waxaad ka heli kartaa caawimo ku saabsan lacagaha iyo jawaabaha su'aalahaaga dabaqa afraad ee Municipal Tower ee magaalada hoose ee Seattle.

### Waxaa naga go'an inaan kugu taageerno Macluumad si fudud loo heli karo loona fahmi karo.

Waxaan u dabaaldegnaa kala duwanaanshaha gobolkeena waxaanan dooneynaa inaan kugu caawino habka adiga kuugu fiican. Tani waxay la macno tahay in lagugu caawiyo luuqado iyo qaabab badan oo buuxinaya baahiyahaaga.

- Waxa aanu bixinaa caawimo luuqado badan ku qoran caawimada biilka Tamarta iyo boggaga internetka ee Barnaamijka Qiimo dhimista Tamarta.
- Waxaan bixina agab la turjumay iyo adeegyada turjumaada oo lacag la'aan ah. Waxaad wici kartaa (206) 684-3000 maalmaha shaqada laga bilaabo 7:30 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo si aad ula hadasho turjumaan bilaash ah.
- Waxaan haynaa caawimo loogu talagalay macaamiisha dhegoolaha ama maqalka adag. Waxaad wici kartaa 711 ka dibna geli (206) 684-3000.

### Waxaa naga go'an inaan kuugu adeegno si xilkasnimo iyo daah-furnaan leh.

Waxaan halkaan u joognaa inaan ku siino macluumaad cad oo ku saabsan biilashaada iyo adeegyadayada. Waxaan ballan qaadaynaa inaan si habboon u maamulno lacagtaada oo aan macluumaadkaas ka dhigno mid la heli karo.

- Waxaan ku tusineynaa sida aan u isticmaalno lacagaha qiime bixiyaha si mas'uuliyad ku jirto warbixinteena sanadlaha ah.
- Waxaan ku darnaa macluumaadka kharashka iyo isticmaalka biilasha macaamiisha.
- Waxaanu kuu sheegaynaa isbeddelada sicirka iyo wararka waaweyn anagoo adeegsanayna biilasha iyo fariimaha kale.
- Waxaan ku siineynaa waqtiyo la qiyaasay adeegga kaa caawin doona inaad qorsheysato.

### Waxaa naga go'an inaan dhisno oo aan ilaalino xiriir ixtiraam leh, oo waxtar leh oo aan kula leenahay adiga.

Hadafkayagu waa inaan noqono lammaane aad aamini karto. Waxaan taageernaa oo filaynaa in midkeenba midka kale si ixtiraam leh ula dhaqmo. Aan wadajirno, bulshadeena oo dhami way horumari kartaa.

Waxaan ballan qaadaynaa inaan noqon doono mid cad, caawiya, oo ixtiraam leh tallaabo kasta oo jidka ah. Waxaan soo dhawaynaynaa jawaab celinta si aan u horumarino adeegyadeena. Haddii aad u baahan tahay gargaar ama su'aalo, fadlan nala soo xiriir. Waxan u joognaa halkan adiga.

Seattle

Seattle.gov/utility-commitments